



IMMIGRANT LEGAL ADVOCACY PROJECT

## **MAXAY DOORASHADU UGA DHIGAN TAHAY XAALADDAADA MUHAAJIRNIMO IYO XAQUUQAHAAGA SHARCIYEED**

Dad badan ayaa su'aal ka qaba ku saabsan waxa uu maamulka cusubi uga dhigan yahay xaaladahooda muhaajirnimo iyo xuquuqahooda sharciyeed. Ma ogaan karno waxa uu Madaxweynaha-La Doortay Trump uu samayn doono illaa uu xafiiska soo galo oo ka bilaab maysa Janaayo 20, 2017. Laga yaabee in uu san samayn wax kasta oo uu yiri in uu samayn doono. ILAP ayaa dabagal ku samayndoonta waxa dhacaya oo waanuna la wadaagi doonnaa waxyaabaha cusub ee muhiimka u ah socdaalka. Waanu sii wadi doonnaa in aannu la shaqayno saaxiibadayada maxalliga ah iyo kuwa qarameedba si aannu ugu doodno xuquuqaha bulshada muhaajirka ah ee Maine iyo macaamiishayada.

### **Waa maxay awoodda uu Madaxweynaha-La Doortay Trump lahaan doono si uu wax uga beddelo shuruucda?**

Kongereeska doortay keliya ayaa beddeli kara xeerarka socdaalka. Madaxweynaha ayaa go'aamin kara sida loo meelmarinayo ama loo fulinayo xeerarka socdaalka, laakiin kuma xad gudbi karo qawaaniinta ama Dastuurka. Haddii uu tan isku dayo, waxaa jira hay'ado badan oo waddanka ku kala firirsan kuwaas oo ka hor iman doona.

Madaxweynaha-La Doortay Trump waxa uu yiri in uu joojin doono parnaamijka Ficilka Dib u Dhigidda ee Imaanshaha Ilma-nimada (Deferred Action for Childhood Arrivals - DACA). Tan wuu samayn karaa isagu sababtoo ah iyadu waa ficil Fulineed, laakiin ma garan karno haddii uu iyada joojin lahaa illaa uu xafiisdka soo galo. Haddii aad haysato DACA ama aad qorshaynaysay in aad codsato waa in aad la hadashaa garyaqaan xagga socdaalka qaabilsan.

### **Kumaa khatar ugu jira masaafurin?**

Madaxweynaha-La Doortay Trump waxa uu yiri in uu masaafurin doono malaayiin dad ah, khaasatan kuwa ay ku dhaceen xukunno fal danbiyeed la xiriiira. Awood waxa uu u leeyahay in uu masaafuriyo dadka aan sharci layaqaanno ku joogin waddanka ama galay fal danbiyeedyo mucayina. Laakiin qofna lama masaafurin karo iyadoon la marin hannaan sharci iyo badanaa dhegaysi garsoore. Haddii aadan xaalad sharci ku sugnayn ama arrinu idin dhexmartay booliiska waa in aad la hadashaa garyaqaan xagga socdaalka ah.

### **Muxuu maamulka cusubi uga dhigan yahay kiiskayga magangelyo?**

Xaqa aad u leedahay in aad codsato magangalyo ma beddeli doono madaxweyne cusubi. Maraykanku (U.S.) waxa uu saxeexay heshiis caalamiya oo oranaya uma oggolaan doonno in dadka la masaafuriyo iyadoo aysan jirin xaqa ay u leeyihiin in ay magangelyo codsadaan haddii ay ka baqayaan in ay waddan koodii ku noqdaan. Kongereeska waxa uu mariyay xeer xaq kuu siinaya xaqa aad u leedahay in aad magangelyo codsato oo Madaxweynuhuna ma beddeli karo kaas Kongereeska la aantiis.

### **Waa maxay xuquuqahaygu?**

Iyada oo an la fiirinayan yaa madaxweyne ah, qof walba oo ku sugan Maraykanka waxa uu lee yahay xuquuqo mucayin ah oo aasaasiya oo ku xusan Dastuurka Maraykanka, xitaa dadka aan wax aqoonsi ah haysan. Xaq baad u leedahay in aad iska aamusto haddii aad booliis is wajahdaan ama saraakiisha ka socota Dhaqangalinta Caadooyinka iyo Socdaalka (ICE), oo waxa aadna codsan kartaa garyaqaan haddii lagu xiro. Xaq ayaad u leedahay in aadan albaabkaaga ka furin ICE ama booliiska in ay haystaan mooyee warqad maxkamadeed.

### **Sidee baan uga warbixiyaa fal-danbiyeed nacayb ku salaysan?**

Haddii aad tahay dhibbane faldanbiyeed, ama haddii lagu han jabay ama aad dareemayso in aad khatar ku sugan tahay waa in aad uga warbixisaa tan booliiska ama wac 911.

### **Ka warran haddii aan qabo su'aalo ku saabsan xaaladdayda sharci-nimo ama doorashooyinkayga socdaalka?**

Waxaad ka wici kartaa ILAP 780-1593 ext. #100 si laguugu muddeeyo ballan aad la yeelato garyaqaan.